

# Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn [öppna förskolan] waxaa lagu soo dhoweeyaa qof kasta iyo ubadkiisa

Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn waa goobo lagu kulmo, oo loogu talagalay dadka waawayn iyo ilmaha da` dooda u dhaxayso 0–6 sano, waxaana ka hawlgalo bareyaal tababarsan. Kahor inta ubadkaaga usan bilaabin dugsiga xannaanadda, waxaad adiga oo ah xilhaayaha xannaanadda/waalidka iyo ubadkaaga booqan kartaan Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn.

Halkaan ayuu ubadkaaga ku ciyaari karaa ciyaar-carruureed oona la kulmi karaa ilmo kale. Maadaama aad tahay xilhaayaha xannaanadda/waalidka waxaad la kulmi doontaa dad kale oo waawayn iyo fursad taageero, talo-siin iyo ka qaybgelista dhaqdhaqaaqa. Waxaad heli doontaa fursad aad bareyeesha ugu sheekeeyso waalidnimada iyo horumarka ubadkaaga. Bareyaasha waxay tixgeliyaan sirta xirfadda.

Waxaan kooxaha qaarkood u heli karnaa fursad turjubaan ka turjuma luqadaha kale. Waxaa lagu siin doonaa aqoon ku saabsan bulshada iyo warbixin ku saabsan dhaqdhaqaaqyada laga helo degmada aad degan tahay.

## Hab-shaqaynta Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn waa sidatan

Booqashada Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn waa lacag la` aan, mana kahor u baahna diiwaan-gelin. Saacadaha Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn ay furan yihiin, waxaad booqan kartaa goorta aad doonayso kana dhaqaaqi kartaa. Tan kale, go` aanka goorta iyo qaabka ka qaybgelista adiga iskaleh.

### Tusaalaha furasadaha Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn laga helo:

- Heeso, muusik iyo ereyo gaagaaban kuwaasoo dareen-kiciya horumarka iyo hadalka ilmaha.
- Jihayn lagu dareen-kiciyo horumarka ilmaha, sida tusaale ciyaar-carruureeda jilayn ku salaysan, halabuurista stuudiyo iyo wax ku dhisida walxa carruureedyada.
- Hal mar toddobaad kasta ayaa dhaqdhaqaaqyada Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn lagu qabta dibadda. Markaas dab ayaa wax ku duban kartaa, waxba rinjiyeeyn kartaa, yeelan kartaa khadar sheekoxariir iyo ilmaha u sameeyn kartaa waddo u ku dhaqaaqo.

- Waxaa goobaha laga iibsaa karaa qaxwo/shaah iwm. Sido kale Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn badidooda waxaa laga heli karaa fursad u qofku ku kululeeysto kuna cunno raashinkii u gurigiisa ka keensaday.

## **Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn ay Dowladda hoose maamusho**

Dhawr Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn ayaa Uppsala ku yaalaan. Lex iyaga kamid ah waxaa maamula Dowladda hoose, barta internetka ee Goobaha xannaanadda ee diiwaan-gelinta u baahnayn kasta waxaad la aqrisan kartaa saacadaha ay furan yihiin.

### **Disponentvillans öppna förskola**

Barta internetka: [www.disponentvillanoppenforskola.uppsala.se](http://www.disponentvillanoppenforskola.uppsala.se)

Lambarka taleefanka: 018-727 54 31

### **Kristallens öppna förskola i Gottsunda**

Barta internetka: [www.gottsundaoppenforskola.uppsala.se](http://www.gottsundaoppenforskola.uppsala.se)

Lambarka taleefanka: 018-727 60 13 och 018-727 63 43

### **Liljeforstorgs öppna förskola**

Barta internetka: [www.liljeforstorgoppenforskola.uppsala.se](http://www.liljeforstorgoppenforskola.uppsala.se)

Lambarka taleefanka: 018-727 76 17

### **Stenhagens öppna förskola**

Barta internetka: [www.stenhagenoppenforskola.uppsala.se](http://www.stenhagenoppenforskola.uppsala.se)

Lambarka taleefanka: 018-727 81 49

### **Sävja öppna förskola**

Barta internetka: [www.savjaoppenforskola.uppsala.se](http://www.savjaoppenforskola.uppsala.se)

Lambarka taleefanka: 018-727 75 51

### **Heidenstams öppna förskola**

Barta internetka: [www.heidenstamsoppenforskola.uppsala.se](http://www.heidenstamsoppenforskola.uppsala.se)

Lambarka taleefanka: 018-727 76 07